IIB MA GAL

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة رسمية

Sannadka 13aad Muqdisho 28 Jannaayo 1985 L. 1rl

## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

## لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadki waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.**

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOOWAAD
### SHARCI

SHARCI L. 1 ee 5 Jen. 1985, Ansixin Shar-ciyada la soo saaray Muddada u dhexeyso kalfadhiga 1aad ee 1984, ilaa Kalfadhiga 2aad ee Sannadka 1984. BOG. 35

### QAYBTA LABAAD
### XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 1 ee 1 Jen. 1985, Dib u habaynta Xeer Nidaamiyaha Lr. 318 ee 18.12.1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay. » 39

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 2 ee 4 Jen. 1985, Magacaabid Sarkaal loo Wakiishay kharashka Miisaaniyadda Sannadka 1985. » 40

**Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 12 Jen. 1985, Magacaabidda Xildhibaannada xulka ah. » 42

QAYBTA SAD/XAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.12.83, Naado Dhul Jaalle Cali Axmed Max'ed L.31 » 43

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.12.83, Naado Dhul Jaalle Cali Mahdi Maxamed L.32 » 44

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.12.83, Naado Dhul Jaalle Ibraahim Shire iyo Maxamed L. 33 » 45

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.12.83, Naado Dhul J.le Jaamac Guure Faarax L.34 » 46

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.12.83, Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Sheegow L. 35 » 47

DAWLADDA HOOSE MUQ. 3.1.84, Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Cali Maxamuud L. 36 » 48

DAWLADDA HOOSE MUQ. 27.10.83, Bed. Naado Dhul Jaalle Madiina Faarax Baashane L. 37 » 49

DAWLADDA HOOSE MUQ. 27.10.83, Bed. Naado Dhul Jaalle Xaaji Muuse Samantar L. 38 » 50

DAWLADDA HOOSE MUQ. 20.9.83, Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabaas Suufi L. 39 » 51

DAWLADDA HOOSE MUQ. 20.9.83, Bed. Naado Dhul Jaalle Yuusuf Jibriil Caris L. 40 » 52

DOWLADDA HOOSE MUQ. 19.1.85 Naado Dhul, Aaran Commercial Company » /52bis

| | | |
|---|---|---|
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17.12.84, Lumid Jeeg War. L. 403579 ku qoran Faarax Cali Qalaf L.41 | » | 53 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.12.84, Lumid Buug Kayd L. 21311 ku qoran Khadiija Islaaw Nuur L.42 | » | 54 |
| MAXKAMADDA GOBOLKA BERBERA, 24.11.84, Lumid Jeegag L. 149346-076913 ku qoran Axmed Maxamuud Ciise L. 43 | » | 55 |
| MAXKAMADDA G. TOGDHEER, Tr; tahay 25;12;1984 Lumid Jeeg War. L.23149 ku qoran Saciid Maxamed Xasan L. 44 | » | 56 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.1.85, Lumid J g War. L. 599538 ku qoran Ibraahim Cismaan Ciid L. 46 | » | 57 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.12.84, Lumid Jeeg War. L. 371624 ku qoran Maxamed Abshir Xuseen L.48 | » | 58 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 26.12.84, Lumid Jeeg War. L. 696717 ku qoran Saleebaan Cabdi Cumar L. 49 | » | 59 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.1.85, Lumid Jeeg War. L. 572466 ku qoran Xasan Yuusuf Cali L. 50 | » | 60 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.1.85, Lumid Jeeg War. L. 572465 ku qoran Xasan Yuusuf Cali L. 51 | » | 61 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.1.85, Lumid Jeeg War. L. 572467 ku qoran Xasan Yuusuf Cali L. 52 | » | 62 |
| SOMALI BOTLING COMPANY HARGEYSA — OGEYSIIS L. 46 | | |

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 1, taariikh 5 Jen. 1985, Ansixin Sharciyada la soo saaray Muddada u dhexeyso Kalfadhiga 1aad ee 1984 ilaa Kalfadhiga 2aad ee sanadka 1984.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la ansixiyay Sharciyada la soo saaray muddada u dhexeyso Kalfadhiga 1aad ee Golaha Shacbiga ee sanadka 1984 iyo Kalfadhiga 2aad ee Golaha Shacbiga ee sanadka 1984 waana kuwa soo socda:-

| | |
|---|---|
| 1. Sharci lr. 36 ee 22.9.1984 | «Oggolaansho meel-marin heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta IDA kuna saabsan Amaah lacageed loogu tala galay Mashruuca Kalluumeysiga Xeebaha Waqooyi Bari». |
| 2. Sharci lr. 37 ee 24.9.1984 | «Xilka Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka». |
| 3. Sharci lr. 38 ee 24.9.1984 | «Dhismaha Hay'adda Daryeelka Naafada iyo Hawl-gabka Ciidamada Qalabka Sida». |
| 4. Sharci lr. 39 ee 20.10.1984 | «Awood siin Madaxweynaha JDS fidin Cafis Guud». |

| | |
|---|---|
| 5. Sharci lr. 40 ee 31.10.84 | «U rogid Sharci, Xeerka Sharci lr. 9 ee 1 Oktoobar 1984 kuna saabsan kordhin muddo fasax qalab iyo badeeco ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah». |
| 6. Sharci lr. 41 ee 31.10.84 | «Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1984». |
| 7. Sharci lr. 42 ee 18.11.84 | «Wax ka beddelid Sharciga Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Deegaanada Sharci lr. 43 ee 1 Disembar 1979». |
| 8. Sharci lr. 43 ee 18.11.84 | «Habayn Xilka iyo Awoodda Qunsuliyadda Soomaaliyeed». |
| 9. Sharci lr. 44 ee 26.11.84 | «Wax ka beddelid iyo wax ku kordhin Sharci lr. 35/-Bis ee 18 Maajo 1981 kuna saabsan Baasaboorrada iyo warqadaha dhoofka». |
| 10. Sharci lr. 45 ee 25.11.84 | «Oggolaansho meel-marinta heshiiska meelgelinta Carbeed ee ka dhexeeya Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka Jaamacadda Carbeed». |
| 11. Sharci lr. 46 ee 25.11.84 | Oggolaansho heshiiska Horumarinta, Badbaadinta iyo Dammaanad siinta Maalgelinta ee ka dhexeysa Waddamada Xubnaha ka ah Ururka Islaamka». |

| | |
|---|---|
| 12. Sharci lr. 47 ee 17.12.84 | «U rogid Sharci, Xeerka Sharci lr. 10 ee 18 Nofembar 1984, dib u habeynta Sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda lr. 2 ee 29.12.1961 iyo lr. 317 ee 17.12.62 iyo beddelaadii ka dambeysay». |

Qod. 2aad

Ansixintan waxay dhaqan geleysaa laga bilaabo Maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 5 Gen. 1985

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

# QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 1 Jen 1985. Dib u habaynta Xeer-nidaamiyaha Lr. 318 ee 18.12.1962 iyo beddelaaddii ka dambaysay.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Qod. 43aad ee Xeer-sharciyeedka Lr. 2 ee 29.12.1961 iyo beddelaaddii ka dambeeyey kuna saabsanaa Sharciga Maamulka Xisaabaadka;

ISAGOO ARKAY: Xeer-Nidaamiyaha Lr. 318 ee 18.12.1962 iyo beddelaaddiisa kuna qornaayeen xeerarka Lr. 33 ee 6.1.1966 iyo 209 ee 27.9.1970 kuna saabsanaayeen Nidaamka Iibsiga, Qandaraasyada iyo Kaydinta Qalabka Dawladda;

ISAGOO AQOONSADAY: In baahi weyn loo qabo in loo fududeeyo Hay'adaha Qaranka habka Iibsiga Tooska ah, sarena loo qaado qiimaha Iibsiga Alaabta iyo Adeegga;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO DHEGTYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

### Qod. 1aad

Qiimaha Iibsiga ama Adeegga Tooska ah ee ku tilmaaman Qod. 1aad ee Xeerka Lr. 209 ee 27.9.1970 iyo Qod. 40aad ee Xeer-nidaamiyaha lr. 318 ee 18.12.1962 waxaa la gaarsiiyey So.Shs. 100.000/=.

Qod. 2aad

Wixii kharash ee ka badan So.Shs. 100.000/= waxaa lagu bixinayaa Qandaraas, iyadoo la raacayo Sharciga Lam. 19 ee 10.4.1978.

Qod. 3aad

Haddii kharajku uu ka badan yahay So. Shs. 2.000.000/= iyadoo la raacayo nidaamka ku tilmaaman Sharciga lam. 19 ee 10.4.1978, waa in la geeyo Golaha Wasiirrada si loo helo oggolaanshahooda.

Qod. 4aad

Waxa la buriyey Qod. 1aad ee Xeerka Lr. 33 ee 6.1.1966, Xeerka Lr. 209 ee 27.9.1970 iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeerkan.

Qod. 5aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 1.1.1985, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 1.1.1985

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 2 ee 4 Jen. 1985; Magacaabid Sarkaal loo Wakiishay kharashka Miisaaniyadda Sannadka 1985.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKEY: Dastuurka Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKEY: Dekreetada sharciga ee soo baxay 29kii Dishembar 1961; Lr. 2, Amarka Maamulka Xisaabaadka;

ISAGOO ARKEY: P.D.R 20 Maarso 1965 L. 13 Xeer nidaaminta iyo Abaabulidda guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriirey iyo wixii bedelaad gashey;

MARKII LA GAREYSTEY: In loo baahan yahay Sarkaal shaqaale loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee soo raaca: Agaasimayaasha Guud-Xafiisyada, iyo qeybaha Maamulka ee lagu tilmaamey sharcigii Lr. ahaa 1 ee 4.1.1968dii, iyadoo uu siinayo awood Maamulidda, qardeysiga ku tala gelidda kharashka shaqo socodsiinta, iskuduwidda iyo soo bandhigidda Xisaabaadka la gareysan karo kuna saabsan qereedaha (Soo hormarin) la sameeyo, Oggolaashada Ruqsadda Dhoofka Safarrada Dibedda iyo gunnadaba.

DEKREETA:

Sarkaal la yiraahdo Jaalle Maxamed Xaaji Cabdi «Fartaag» — Darajo A4/2 Agaasimaha Guud ee Maamulka Lacagta MJDS, waxaa loo magacaabay Sarkaal Wakiileed kharashka Miisaaniyadda Sanadka ee Lacagta MJDS iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusey, laga bilaabo 1da Jannaayo 1985.

Dekereetadan waxay dhaqan geleysaa haddatan, isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 1

Muqdisho 8.1.1985

Hantidhawraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 4.1.1985

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 3, taariikh 12 Jen. 1985, Magacaabidda Xildhibaannada xulka ah.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka iyo beddelaaddii ka dambeysay;

MARKUU ARKAY: Sharciga doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka;

MARKUU ARKAY: Qod. 61aad, faqradda 4aad, ee Dastuurka oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS in uu Xildhibaanno Golaha Shacbiga u magacaabo ilaa lix qof oo laga dhex xulo dadka si gaar ah ugu soocmay goobaha cilmiga, adabka, fanka, ama leh qiimo sare ee waddaninimo;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in xilalkaas loo magacaabo Jaallayaasha hoos ku tilmaaman oo buuxiyey shuruudaha dastuuriga ah ee ku xusan Qod. 61aad, faqraddiisa 4aad;

MARKUU TIXGELIYEY: Ku dhawaaqidda natiijada kama dambeysta ah ee doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka oo la qabtay 31kii Disember 1984;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay Xildhibaanno Golaha Shacbiga:

1. Dr. Xasan Sheekh Ibraahim;
2. Jaalle Cali Saciid Xaarato;

3. Jaalle Cabdulle Mahdi Qaylow;
4. Jaalle Maxamuud Diiriye Maxamed Cabdulle;
5. Jaalle Cabdiraxmaan Aadan Sacab-ku-nool iyo
6. Dr. Xuseen Sheekh Cabdiraxmaan (Xuseen-Mataan).

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geleyaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 12.1.1985

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

DAWLADDA HOOSE E4 MUQDISHO

— Waaxda Maamulka Dhulka Rasmiga ah —

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaallayaasha Sha. Cali Axmed Maxamed, Abshir Xaaji Axmed iyo Muriidii Xaaji Axmed ay u soo qorteen Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 8.9.83, uu ku wediistay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadda Afgooye, Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400.- MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU TIMAA.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Afgooye

B a r a i waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Dic. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka ee D/Hoose

Jaalle Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 31

DAWLADDA HOOSE E4 MUQDISHO

— Waaxda Maamulka Dhulka Rasmiga ah —

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Mahdi Maxamed uu u soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 5.6.82, uu ku weydiistay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Jidka Afgooye, Qaabkiisuna yahay Trabesiyo Addimihiisuna yihiin (80+100). 100 kuna fadhiya 9.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 2-4-W.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Shariif Calawi

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lambar 5 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Dic. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka ee D/Hoose

Jaalle Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 32

DAWLADDA HOOSE E4 MUQDISHO

— Waaxda Maamulka Dhulka Rasmiga ah —

N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim-Shire iyo Maxamed Jaamac ay u soo qorteen Alji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 8.11.1983 uu ku weydiistay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Waddada Afgooye Qaabkiisuna yahay Triyangolo Addimihiisuna yihiin 200+150+140 kuna fadhiya 14.250/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada Afgooye.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul dad.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Dic. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka ee D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 33

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

— Waaxda Maamulka Dhulka Rasmiga ah —

N A A D O — D H U L

Waxaa la coddeynayaa in Jaalle Jaamac Guure Faarax uu u soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 30.3.83 uu ku weydiisay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Afar Gees Isle'eg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 6

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 19

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 17.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Dic. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka ee D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 34

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## — Waaxda Maamulka Dhulka Rasmiga ah —

## N A A D O — D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Sheegow uu u soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 20.7.1983 uu ku weydiistay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadada Afgooye Qaabkiisuna yahay Trabesiyo Addimihiisuna yihiin (150X250) + (250 + 220) × 100 kuna fadhiya 61.000/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Afgooye

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul dad

Galbeed waxaa ka xiga: Dhulka Ibraahim Shire

B a r i waxaa ka xiga: Jid Cadde

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Dic. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka ee D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 35

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NOODO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Cali Maxamuud maalintii taariikhdu ahayd ———— loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettanlar Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyay 600 MQ. looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa whg3/23/321 ee 7 Lug. 1976 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 241-B |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 237-B |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 240-B |

Mnqdisho, 3 Jen; 1985

Agaasimaha Waaxda Maamulka D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 36

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiis-tay Jaalle Madiina Faarax Baashane maalintii taa-riikhdu ahayd 29.5.76 loona ogolaaday oo ku yiil Muq-disho Degmada Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600/= MQ. looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan si-daa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkee-duna ahaa WMG/3/23/407-76 ee 9.8.1976 oo ka soo ba-xday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaa-man.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed waxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 613 X. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lambar 610-612 X. |

Muqdisho, 27 Ott. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 37

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xaaji Muuse Samatar maalintii Taariikhdu ahayd 31.7.1967 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 60X50 kuna fadhiyey 3000/= MQ. looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa 1297/720 ee 21.7.68 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed waxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 40X90 kuna fadhiya 3600/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lambar 611-612

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 27 Ott. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 38

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaain dhulkii uu soo weydiis-tay Jaalle Maxamed Cabbaas Suufi maalintii taariikh-du ahayd 20.10.74 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Shibis Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addi-mihiisuna ahaayeen 20X16,50 kuna fadhiyey 330/= MQ. looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Shibis sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG/3/23/593 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed waxuu ku yaal Deg. Shibis Qaabkiisu waa Trabesiyo Addimihiisuna yihiin (37,70+26)X16 kuna fadhiya 509,60 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Dad leh

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 31

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 20 Set. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 39

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aaran Commercial Company uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 24.7.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-Shiid Waddada ———————— qaabkiisu yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 200X100 kuna fadhiya MQ. 20.000.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo.-

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
Jaalle Maxamuud Cabdi Cismaan

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Yuusuf Jibriil Caris maalintii Taariikhdu ahayd 9.1.67 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 75X40 kuna fadhiyey 3000/= MQ. looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed waxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 40X120 kuna fadhiya 4800/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiag: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 20 Set. 1983

Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka D/Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 40

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 403579 lagana soo saarya Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Jaalle Faarax Cali Qalaf sida ku cad warqadda lambarkeedu 023711 taariikhdeedu 17.12.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega lam. 403579 oo ku qoran Jaalle Faarax Cali Qalaf ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.12.1984

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 41

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 21311 lagana soo saaray Bangıga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaalyieed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 12.034,02/= uu iska lahaa Jaalle Khadiija Islaaw Nuur sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0002812 taariikhdeedu 18.12.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 21311 oo ku qoran magaca Khadiija Islaaw Nuur ayna ku jirto Sh.So. 12.034,02/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Khadiija Islaaw Nuur Buuga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 19.12.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 42

MAXKAMADDA DEG. GOB. BERBERA

GARSOORAHA MAXKAMADDA G/DEG. BERBERA

MARKUU ARKAY: Dacwadda hore ee qoran;
MARKUU OGAADEY: Arjiga uu soo qoray Jaalle Axmed Maxamuud Ciise deggan Berbera uuna ku caddaynayo in ay ka lumeen Labada Jeeg ee kala ah:- J.W.L. 149346 ay ku qoran tahay Sh.So. 4800/- iyo J.W.L. 076913 ay ku qoran tahay Sh.So. 1000/= iyadoo laga xaday 1.9.84, sida ku cad Arjigiisa;

MARKAAN ARKAY: Xaashida caddayn Bangiga Ganacsiga K.S. Laanta Berbera ee Summaddeedu tahay 001544, ee la goray 21.11.84, ayna ku caddahay in ay labadaasi Jeeg ee kor ku qorani laga xaday Jaallaha Ogeysiinta ku qoran;
MARKAAN ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65. n.2;

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda Jeegagga Wareega Lamb. (1) J.W.L.149346, Sh.So. 4800/= ku qoran yahay Shukri Cabdi Cumar J.W.L. 076913 Sh.So. 100/= la qoray 1.9.84 ku qoran yahay Cabdillaahi Cali Barre.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Labada Jeeg ee Wareega lambar lambarkood ku qoran yahay loona cusboonaysiiyo magacyada ku qoran (30) soddoon casho kaddib markii Amarkan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda. Waxaa laga Codsanayaa in Jeegagga Cusub ee lasamayndoono gacanta laga saaro Axmed Maxamed Ciise (DHEEG) amase qof ka sita Awood sharci ah iyadoo la sugaayo muddo (30) casho ah.

Berbera, 24.11.1984

GARSOORAHA MAXKAMADDA G/DEG. BERBERA
(Maxamed Axmed Wardheere)

L. 43

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJ: Baafin Jeegga Wareega ee lam. yahay 23149

GUDDOOMIYAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Lumid Jeegga War. ee kor ku xusan;

HADDUU ARKAY: Ogaysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, DL 9.9.65. Lumid J/W ee Lam. 23149 ee ku qoran Jaalle Cab/Khaalaq Cabdiwahaab Guuleed kuna jirtay Sh.So. 100,000/=

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaas Wareega Jaalle Saciid Maxamed Xasan markay ka soo wareegto muddo 20 casho gudahood ah laguna shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro Jaalle Cab/Khaalaq Cab/wahaab Guuleed, iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.
Tr; tahay 25;12;1984

GARSOORAHA MAX. G/TOGDHEER BURCO
(Maxamed Xaaji Cab/qaadir)

L. 44

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 599538 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Laascaanood kuna qoran lacag dhan Sh.So. 26.000/ uu iska lahaa Jaalle Ibraahim Cismaan Ciid sida ku cad warqadda lambarkeedu 0069 taariikhdeedu 5.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa-Laanta Xis-Guud;

HADUUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. lam. 599538 oo ku qoran Ibraahim Cusmaan Ciid ayna ku jirto Sh.So. 26.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta L/Caanood u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faainta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.1.85

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 45

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 371624 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 6.000/= uu iska lahaa Jaalle Maxamed Abshir Xuseen sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000662 taariikh 4.12.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortnmeato) Jeegga Lam. 371924 oo ku qoran Maxamed Abshir Xuseen ayna ku jirto Sh.So. 6.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad u badalo Maxamed Abshir Xuseen Jeegga aan kor ku soo tilmaanay una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ahee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho,6.12.1984

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamde Maax

L. 46

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG C/GAABO

UJEEDDO: BEDDELAAD JEEGGA WAR. LR. 696715

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Sanaag Ceerigaabo

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: In Jeegga lumay oo lambarkiisu yahay 696715, kana soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo, ee Gobolka Sanaag kuna qoran tahay lacag dhan Konton kun oo Shilin (50.000) uuna lahaa Jaalle Saleebaan Cabdi Cumar sida ku cad xaashida lambarkeedu yahay 000218 ee 24.12.84, kana soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Gobolka Sanaag Laanta Ceerigaabo;

MARKII UU ARKAY: Qod. 69 sharciga lambarkiisu yahay —— ee 29.9.65.

WUXUU XEERIYAY SIDAN

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga lam. 696715 kuna qoran yahay Jaalle Saleebaan Cabdi Cumar, ayna ku taal lacag dhan Konton kun oo shilin (50.000).

Waxaana la Oggolaaday in Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Ceerigaabo u bedelo Jaalle Saleebaan Cabdi Cumar Jeegga kor ku qoran una sameeyo mid la mid ah, markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn shan iyo Toban maalmood 15 maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Ceerigaabo, 26.12.1984

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SANAAG CEERIGAABO

(Dr. Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

L. 47

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 572465 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000=/ uu iska lahaa Jaalle Xasan Yuusuf Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu 003129 taariikhdeedu 23.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lam. 572465 oo ku qoran Xasan Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

### WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.1.1985

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 48

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 572467 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 10.000/= uu iska lahaa Jaalle Xasan Yuusuf Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu 0091329 taariikhdeedu 23.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lam. 572467 oo ku qoran Xasan Yuusuf Cali ayna ku jirto Sh.So. 10.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.1.1985

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

N. 40

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDUU ARKAY: In Jeegga War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 572466 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Jaalle Xasan Yuusuf Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu 0081329 taariikhdeedu 23.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 572466 oo ku qoran Xasan Yuusuf Cali ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Laanta Labaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood

laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.1.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 50

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 197246 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Jaalle Maxamuud Faarax Maxamuud sida ku cad warqadda lambarkeedu 85 taariikhdeedu 24.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 197246 oo ku qoran Maxamuud Faarax Maxamuud ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.1.1985

GUDDOOOMIYAHA MGB
D.r Ca'bdullaahi Maxamed Maax

L. 51

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War· dhumay oo lambarkiisu ahaa 478958 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Jaalle Ismaaciil Cali Caateeye sida ku cad warqadda lambarkeedu 0003073 taariikhdeedu 27.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J.Wareega Lam. 478958 oo ku qoran Ismaaciil Cali Caateeye ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo J.Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.1.1985

GUDDOOOMIYAHA MGB
D.r Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 52

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 20366 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 42.912,81/= uu iska lahaa Jaalle Warsame Cigaal Warsame sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0002939 taariikhdeedu 8.1.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 20366 oo ku qoran Magaca Warsame Cigaal Warsame ayna ku jirto Sh.So. 42.912,81/=.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u badalo Warsame Cigaal Warsame Buugga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 9.1.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

SOMALI BOTTLING COMPANY
HARGEYSA

# O G E Y S I I S

Waxaa Saamileyda xushmadda leh ee Shirkadda «SOMALI BOTTLING COMPANY» ee Hargeysa la ogeysiinayaa in fadhigii sanadlaha ee shirweynaha guud la yeelan doono maalinta 31ka bisha Maarso sannadka 1985ka, saacaddu marka ay tahay 4ta gelinka dambe, kaasoo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Hargeysa.

Haddii fadhigaasi ansaxmi waayo, isu yeeridda marka labaad waxay ahaan doontaa maalinta 9aad bisha Abril sannadka 1985ka, isla meesha iyo saacadda kor lagu soo tilmaamay.

Ujeeddada isu yeeridda waa in laga arrinsado inta soo socota:

1. Oggolaanshaha Miisaaniyadda sannadda 1984kii.
2. Doorashada Guddiga Xisaab Baarista.
3. Wixii kaloo soo jeediyo.

SOMALI BOTTLING COMPANY

GUDDOOMIYAHAAHNA MAAMULAHA IDMAN

Maxamuud Axmed Maxamed «W.Wiliq)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT. 12/85

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco.

Uj: Lumid Jeega Wareega ee Lumay

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Wareega ee Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D,L, 9-65 Lumid Jeegagga Wareega ee lr, yahay 447188 Sh.So. 20.000 tr. 12.12.84 J.W. lr. 447187 Sh.So. 20,000 J.W. lr. 447189 Sh. So. 7.500 tr, 12.12.84 kuna qoran yihiin Xamuud Cismaan Ma/d

WUXUU AMRAYA

In la cusboonaysiiyo Jeegagaas Wareega ee kor ku xusan Jaalle Xamuud Cismaan Maxamed markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Waxaa laga cosanayaa in Jeegaga War. ee Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Xamuud Cismaan Maxamed iyadoo la sugayo muddada kor ku Xusan.

Burco, 5.1.85

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco.
Xaliimo X. Cabdi Aadan tanzs nis
Kaaliyaha Max/dda Gobolka Togdheer Burco.